Seattle Office of Labor Standards

# Xeerka Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada, SMC 14.16

## Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada iyo cudurka COVID-19 -- Su'aalaha Badanaa Nala Waydiiyo iyo jawaabahaooda

Shirkadaha iyo shaqaaluhu waxay qayb ka qaadan karaan ilaalinta badbaadada iyo caafimaadka bulshada ayagoo xaqiijinaaya in shaqaaluhu adeegsadaan Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada (PSST). Dukumiintigaan waxa uu ka jawaabayaa su'aalaha aad ka qabi karto sharciga Seattle ee Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada. Fadlan booqo webseetka [Xafiiska Heerarka Shaqaalaha (Office of Labor Standards)] si aad u hesho xog dheeraad ah oo faahfaahsan.

Xeerka Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada (Paid Sick and Safe Time Ordinance):

- Wuxuu difaacaa caafimaadka dadwaynaha asagoo xaqiijinaaya in shaqaalaha iyo carruurtu guriga joogaan, aysan u dhawaan shaqaalaha kale, dugsiga, iyo macaamiisha markay xanuunsan yihiin.
- Wuxuu abuurayaa goobo shaqo oo wax soo saar badan asagoo yaraynaaya faafida cudurka.
- Wuxuu dhisayaa amaan dhaqaale waayo shaqaaluhu waxay daryeeli karaan caafimaadkooda ayagoon waayin mushaarkooda.

---

### Waa maxay Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada (PSST)?

Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada waa waqtiga fasaxa ay shirkad mushaarka ku bixiso kaasoo shaqaaluhu u adeegsan karaan:

- Inay daryeelaan naftooda ama xubnaha qoyskooda ee xanuunsan, dhaawacma, ama xaalad caafimaad qaba
- Inay u tagaan dhakhtarka si ay u helaan daryeel caafimaad iyo mid ka hortag
- Marka goobtooda ganacsiga ay xiraan saraakiisha dawladu sababo caafimaad awgood
- Marka dugsiga ama goobta daryeelka ee ilmahooda ay xiraan saraakiisha dawlada sababo caafimaad awgood

### Maxay shaqaaluhu ka helaan PSST?

Gudaha Seattle, sharciga ayaa ka doonaaya shirkadaha loo shaqeeyo inay siiyaan dhammaan shaqaalaha Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada. Shaqaalahaan waxaa ku jira kuwa sida buuxda u shaqeeya, kuwa nus maalinka shaqeeya, kuwa ku meel gaarka ah, kuwa gaarka ah, iyo shaqaalaha caadiga ah.

### PSST meeqa dhan ayay helaan shaqaaluhu?

Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada waxaa lagu helaa saacadaha shaqada dheeraadka ah. Cadadka ayaa ku xiran inta saacadood ee shaqaaluhu shaqeeyo iyo xajmiga ganacsiga shirkada uu u shaqeeyo. Si aad u hesho faahfaahin, booqo webseetka [Xafiiska Heerarka Shaqaalaha].

### Meeqa PSST ah ayuu shaqaale qaadan karaa halkii mar?

Shaqaaluhu waxa uu adeegsan karaa mid uun ama dhammaan saacadaha uu kaydsaday iyo kordhinada yar ilaa cadadka ugu yar waqtiga shirkadu kula socoto waqtiga shaqada (laakiin aan ka badnayn saacad).

### Sidee ayuu shaqaale ku helayaa isku dheeli tirnaanta PSST giisa?

Shirkaduhu waa inay la wadaagaan xogtaan mar kasta oo ay mushaarka baxshaan. Shirkado badan ayaa xogtaan ku qora risiidyada mushaarka ama kusoo qora nidaamka mushaar bixinta oo oonleen ah.

### Shaqaale ma adeegsan karaa PSST haddii goobtiisa shaqada, dugsiga ilmaha, goobta daryeelka ilmaha ay xiraan saraakiisha dawladu sabab la xariirta suuragalnimada in cudur faafo sida COVID-19?

Haa. Iyo, shirkada ayaa u fasixi karta shaqaale inuu adeegsado waqtiga PSST ga ee uu kaydsaday marka la xiro goobta shaqada ee shaqaalaha, dugsiga ilmaha, goobta daryeelka ilmaha, laakiin aysan jirin amar kasoo baxay saraakiisha dawlada. Tusaale, haddii maamulaha dugsi gaar loo leeyahay (kaasoo aan ahayn sarkaal dalwadeed) uu xiro dugsiga

ilmaha shaqaalaha, shirkada ayaa, ayadoo kaashanaysa garashadeeda, u fasaxaysa shaqaalaha iyo inuu adeegsado waqtiga PSST ee kaydka u ahaa.

**Yaa ah sarkaal dawladeed?**

Sarkaal dawladeed waa shaqaale dawladeed kaaso awood loo siiyay inuu xiro ganacsi ama dugsi. Kuwaan waxaa ku jiri kara saraakiisha heer deegan, heer gobal, iyo heer federaal iyo saaraakiisha caafimaadka dadwaynaha (tusaale, Seattle - Waaxda Caafimaadka ee Degmada King (Seattle - King County Public Health), Xarunta Ka hortaga Cudurka (Center for Disease Control), ama Waaxda Caafimaadka ee Gobalka (State Department of Health)) maamulaha guud ama maamulaha dugsi dawladeed.

**Shirkaduhu ma waydiin karaan faahfaahinta sababta shaqaaluhu u codsanaayo inuu adeegsado PSST?**

Maya. Shaqaalaha lagama doonaayo inay u sheegaan shirkada sababta ay ua deegsanayaan PSST. Shirkadaha loo shaqeeyo ayaa codsan kara dukumiintiyada cadaynaaya sababta maqnaanshaha kadib wax ka badan saddex maalmood oo kuwa shaqada ah oo lagu qaatay PSST.

**Ma ka dooni kartaa shaqaale inuu adeegsado PSST?**

Maya. Shirkaduhu kuma qasbi karaan shaqaalaha inay u adeegsadaan PSST maqnaansho qaab kale uu u fasaxaayo sharcigu.

**Shirkadu ma ku qasbi kartaa shaqaalaha inuu guriga aado markuu jiran yahay?**

Sharciga PSST kama mamnuucaayo shirkada inay shaqaale u dirto guriga sabab cudur awgeed. Sharciyada kale ee gobalka ama deegaanka ayaa go'aamin kara inay sharci tahay ama ay shardi tahay in qof loo diro guriga. Tusaale ahaan, sharciyada Waaxda Caafimaadka ayaa ka doonaaya shirkada inay shaqaalaha ka shaqeeya adeegga cuntada guriga u dirto haddii uu qabo astaamaha matag ama dhuun xanuun qandho wata. Wixii xog dheeraad ah, arag [Xeerka Maamulka ee Washington 246-215] ama la xariir [Waaxda Caafimaadka ee Seattle-Degmada King].

**Shirkadu ma ka hor istaagi kartaa shaqaale inuu shaqeeyo sabab la xariirta inuu u safray wadan cudurku ka dilaacay?**

Socdaalka lagu aado wadan ama gobal gaar ah maaha cadayn la isku halayn karo oo muujinaysa in qofku qabo cudurka COVID-19. Ma jirto koox gaar ah oo masuul ka ah ama ay tahay in lagu beegsado sabtida faafida cudurka COVID-19. Xog ku aadan sida looga hortago iyo sida looga jawaabo fikradaha qaldan iyo faafida xogta beenta waxaa laga heli karaa in [halkaan la gujiyo]. Qaadista talaabo khaldan oo shaqo oo salkeedu yahay isirka shaqaalaha ama wadanka uu kasoo jeedo waxay keeni kartaa dacwada isir kala sooca. Wixii xog dheeraad ah, la xariir [Xafiiska Xaquuqaha Madaniga ah (Offcie of Civil Rights)] oo aad ka helayso 206-684-4500.

**Maxaa dhacaaya haddii shaqaale uu adeegsado dhammaan PSST giisa kaydka u ahaa ama shaqaale cusub oo aan lahayn wax waqti fasax oo u kaydsanaa uu fasax qaato?**

Shirkada waxaa kaliya laga doonayaa inay shaqaalaha siiso adeegsiga saacadaha PSST ga ee uu kaydsaday. Ayagoo kaashanaaya garaadkooda, shirkaduhu waxay bixin karaan waqtiga fasaxa mushaarka lagu baxiyo oo dheeraad ah ama waxay ogolaan karaa adeegsiga fasaxa nasiinada ama fasaxyada kale ee kaysan. Sharciyada kale ayaa ka dooni kara shirkada inay shaqaalaha siiso fasax; ayna ku jiraan: Sharciga Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka (Family and Medical Leave Act), Fasaxa Mushaarka lagu baxiyo ee Qoyska iyo Caafimaadka ee Gobalka Washington (Washington State Paid Family Medical Leave), sharciyada federaalka, kuwa gobalka, iyo kuwa maxaliga ah ee naafada.

**Shaqaaluhu ma ugu deeqi karaa waqtiga PSST oo uusan isticmaalin qorshaha ku deeqista fasaxa mushaarka lagu qaato si uu u caawiyo shaqaalaha la shaqeeya ee u baahan PSST?**

Haa, haddii shirkadu leedahay barnaamij hawshaan ogol. (Ma jiro sharci qasab ka dhigaaya.)

**Shaqaalaha qasab may ku tahay inuu helo qof daboola saacadaha uu u baahan yahay PSST?**

Maya. Shirkadu kuma qasbi karto shaqaale inuu keeno qof daboola saacadaha uu ku maqan yahay fasaxa PSST.

Macluumaadka kujira dukumiintigaan looguma talagalin inuu noqdo talo sharci mana ahan in loo isticmaalo sida inuu yahay xeerar ama sharciyo

Seattle Office of Labor Standards

# Xeerka Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada, SMC 14.16

**Shaqaaluhu ma isku badalan karaa tookooyinka shaqada halkii uu ka adeegsan lahaa Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada?**
Haa. Haddii labadaba shirkada iyo shaqaaluhu ku heshiiyaan, shaqaaluhu waxa uu badalan karaa tookada shaqada halkii uu ka qaadan lahaa PSST.

**Shaqaalaha Dugsiyada Dadwaynaha ee Seattle (SPS, Seattle Public Schools) ma ku jiraan Sharciga Seattle ee Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada?**
Maya. Laakiin, qaar kamid ah shaqaalaha SPS waxaa dabooli kara sharciga Fasaxa Mushaarka lagu baxiyo ee qofka xanuunsan ee Gobalka Washington (Washington State Paid Sick Leave). Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan difaacyada gobalka, booqo: https://lni.wa.gov/workers-rights/leave/paid-sick-leave/.

**Shaqaaluhu ma u adeegsan karaa PSST sababo ka baxsan kuwa sharcigu difaacaayo?**
Haa. Shirkadu waxay u ogolaan kartaa shaqaalaha adeegsiga PSST ay u adeegsadaan sababo aan ka ahayn kuwa sharcigu amraayo.

**Yaan wici karaa haddii aan su'aalo badan ka qabo xaquuqdayda ama waajibaadkayga ku cad sharcigaan?**
Fadlan wac Xafiiska Heerarka Shaqaalaha (OLS) oo aad ka helayso 206-256-5297 ama booqo webseetkeena oo aad ka helayso **http://www.seattle.gov/laborstandards.** Waxaan ka jawaabi karnaa su'aalaha waxaana bixin karnaa xog!

**Xagee ayaan ka helayaa xog dheeraad ah oo kusaabsan cudurka COVID-19 (oo horay loogu yaqaanay novel coronavirus) iyo talaabooyinka aan qaadi karo si aan ugu diyaar garoobo?**
Booqo webseetka Seattle - Waaxda Caafimaadka ee Degmada King iyo xaashidooda xogta ee ka hadlaysa COVID-19 si aad u hesho xog dheeraad ah, oo ay ku jiraan su'aalaha badanaa nala waydiiyo oo balaaran iyo sidoo kale talooyin ku aadan u diyaar garoowga cudurka ee bulsho waynta, dugsiyada, goobaha shaqada, iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka.